**WARSAXAAFADEED** **TAARIIKHDA:** 19 Maarij 2018

# Cadaalad u Raadinta Kufsiga ka Dhaca Somaliland: Doorka Hey'adaha Cadaalad-marinta Danbiyadda

Golaha Wakiilada Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu ansixiyey 8dii Janawari 2018 Mashruuca-sharci ee Kufsiga iyo Xadgudubyada Xidhiidhka la Leh oo aad wax ugu bedellay qodobada Xeerka Ciqaabta Guud ee waqtigoodii dhacay. Haddii ay Golaha Guurtida iyo Madaxweynuhu ansixiyaan nuqulkan Mashruucan-sharci, dacwad ku oogista kufsiga mar dambe laguma salaynayo oo kaliya caddeynta isticmaalka xoog, ciddii lagu xukumo gelista dambigaasna wuxuu muteysanaya xabsi dheer. Shaki kuma jiro in ansixinta Mashruucan-sharci ay tahay talaabo wax ku ool ah. Hase yeeshe, xaqqiiqadu waxa weeye in wax ka bedelka xeerarka ciqaabta ee Somaliland aanay kaligeed isla markiiba kufilnayn dacwad oogis denbiyada kufsiga oo si tayo leh u hanaqaada.

Horizon Institute waxay warbixin ay soo saartay *maanta*?, oo cinwaankeedu yahay *Cadaalad u Raadinta Kufsiga ka Dhaca Somaliland: Doorka iyo XaddidaadaHey'adaha Cadaalad-marinta Danbiyadda,* ku diwaangalisya caqabadaha badan ee dhaafsan xeerka ciqaabta ee gaboobay, ee hortaagan dacwad oogista kufsiga. Warbixintan oo ka kooban 51 bog waxay ku saleysantahay in ka badan 100 wareysi oo lala yeeshay garsoorayaal, xeer-ilaaliyaal, denbi-baadhayaal, qareeno, xubnaha gudiyada tuulooyinka, odayaal iyo xirfadlayaasha caafimaadka, oo ka soo jeeda lixda gobol, miyi iyo magaaloba, sannaddihii 2015 ilaa 2018.

Waxaa carqalad weyn ku ah dacwad oogista kufsiga ka dhaca Somaliland ka gaabsiga dhibanayaasha in ay soo sheegaan falalkaas loo geystay, oo aanay markaas hey'adaha cadaalad-marintu dacwad oogi karin. Warbixintu waxay si faahfaahsan u sheegeysaa sababaha badan ee gabadh ama haweeney aanay u soo sheegin ama ka caban falkaas, oo mid ka mid ah tahay ceeb iyo dhaleeceyn. Kalkaaliso caafimaad ka hadleysey sababta dadka tuulada Farawayne 'aanay uga hadlin kufsiga' ayaa tidhi -

> Xubnaha bulshada waxay odhanayaan waa la kufsaday, oo cidina ma rabto inay guursato. Xitaa marka odoyaashu ay kiisaskan dhexgelaan, cidna uma sheegaan sababta oo ah ceebta kufsigala xidhiidha.

Daraasadda Horizon waxay oggaatay sababaha kale ee dhibaneyaasha kufsigu aanay u sheegin falalkaas oo ay ka mid yihiin saameynta odayaasha ama aqoon la'aanta iyo kalsooni la'aanta laga qabo hey'adaha cadaalad-marinta denbiyada. Warbixintu waxay farta ku fiiqday kharashka u dacwadoonta maxkamad oo aan la karikarin, ahna caqabad weyn, gaar ahaan dadka reer miyiga ah. Oday deggan Salaxlay oo u jirta caasimada Hargeysa 69 Kiiloo Mitir ayaa sidan ku sheegay sababta kharashka cadaalad doonku uu u hor istaago isticmaalka maxkamadaha.

> Marka uu qof halkan ka ambabaxo oo uu tago Hargeysa, kharash badan, oo inta badan ah kirada gaadiidka, ayaa ku baxa. Waxaa kaloo ah in ay bixiyaan kharashka cuntada iyo hoyga Hargeysa. Dhibanaha qoyskeedu waa in ay bixiyaan kharashka markhaatiyaasha, oo haddii ay afar qof geeyaan maxkamada Hargeysa, kharashku waa ugu yaraan $200. Qoysaska badankoodu lacagtaas ma heystaan. Mararka qaarkood, qoysasku waxay amaah ka qaataan jaarkooda ama waxay iibiyaan xoolahooda. Kharashkaas awgeed, qoysasku waxaaba laga yaabaa in ay go'aansadaan in aanay kiiskii kufsiga maxkamadba geynin.

Caqabadahaas hortaagan sheegista kufsiga ayaa keena in kiisas badan oo kufsi ah lagu xallilo habka cadaalada ee dhaqanka ee loo yaqaan 'xeer'. Hase yeeshe'e heshiisyada dhaqameed si gaar ah cidda falalka gashay uma abaaraan in ay mas'uuliyadeeda si mug leh u qaadaan. Waxaa se eedeysanaha, inta badan, uun la weydiiyaa magdhow lacageed oo bixinteeda ay la qeybsadaan qoyskiisa iyo xubnaha qolodiisa, oo kolkaas aanu eedeysanuhu keligii bixin. Tan kale, marar cayiman, heshiis dhaqameedku wuxu sheegaa in eedeysanuhu guursado dhibanihii la kufsaday. Si kastaba ha ahaatee, eedeysanuhu waa xor, oo wuu ogsoonyahay haddii uu cid kale kufsado, in aan cawaaqib xumo shaqsi ah aanu la kulmi doonin.

Xitaa marka haweenay ay ka dacwooto kufsi oo kiiskeedu gaadho hey'adaha cadaadal-marinta danbiyada, qoysaska ayaa barbar wada wada hadalo ah in dacwada hab dhaqan lagu xaliyo, haddii ay ku gaadhaan heshiisna, kiiskaa waa la joojiyaa.

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Somaliland, Xasan Axmed Aadan, ayaa soo saaray 2014kii Wareegto uu xeer-ilaaliyayaasha iyo garsoorayaasha in aanay aqbalin heshiisyada dhaqanka ee kiisaska kufsiga.

Sida la soo sheegay, hirgelinta Wareegtadan waxoogaa saameyn ah ayuu yeeshay, khaasatan magaalooyinka waa weyn, gaar ahaan Hargeysa, sida uu yidhi U Doodaha Dadweynaha ee Gobolka Maroodi-Jeex ee Hargeysa ka tirsantahay.

> Shakhsiyan maan arkin ilaa 2015kii kiis kufsi ah oo maxkamadaha laga saaray. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha, Maxkamadda Sare, xukuumadda iyo beesha caalamka ah ayaa aad ugu cadaadiyey maxkamaddaha in aanay dacwadaha kufsiga ee la soo oogay joojin haddii qoysasku ay ku heshiiyeen magdhow oo ay rabaan in kiisaska la soo afjaro. Waxaan qabaa in cadaadiskaasi wax ku ool noqday, ugu yaraan Hargeysa oo aan ka shaqeeyo.

Hase yeeshee, dad kale oo ka shaqeeya hay'adaha Cadaalad-marinta Danbiyada kuma kalsoona in Wareegtada Xeer Ilaaliyaha Guud ay yeelatay saameyntii loogu talogalay. Garyaqaan adeega kaalmada sharciga ka shaqeeya ayaa ku dooday in taa cagsigeeda Wareegtadii Xeer-ilaaliyaha Guud ay "ka joojisay kiisaska in xitaa la soo sheego".

> Ilaa iyo markii ay soo baxday Wareegtadii Xeer-ilaaliyahay Guud 2014, kiisaska kufsiga intooda badani waxay si toos ah ugu leexdaan xagga habka dhaqanka. Odayaashu way ogsoonyihiin in laga yaabo maxkamadduhu in aanay aqbalin heshiis dhaqmeedka oo markaas maxkamadaha gabi ahaanba way baal maraan.

*Cadaalad u Raadinta Kufsiga ka Dhaca Somaliland* waxay sheegeysaa in kastoo Wareegtadii ay u suurtagelisey xeer ilaaliyayaasha iyo garsoorayaashu in ay diidaan heshiis dhaqmeedka, kiisaska kufsiga ah weli waxaa lagu xalliyaa habka dhaqanka ee '*xeerka'* waayo lama soo sheego, ama waa laga noqdaa ama laga saaraa maxkamadaha si ka soo horjeeda Wareegtadii.

Wareegtadii in ay wax ku ool noqtay iyo in aanay noqonba, hay'adaha cadaalad-marinta danbiyada waxa horyaala mushkilado marka la oogayo dacwad, oo ay gaar ahaan ka mid yihiin caddeymo la'aan.

Dacwad oogistu waxa kaliya ay joojin kartaa ciqaab la'aanta danbiyada kufsiga ah haddii la helo caddeymo ku filan in danbiga lagu xukumo eedeysanaha, taasoo ah mushkilad dacwad oogayaasha aduunka oo dhami ay la kulmaan. Baadhitaanadu waxay bilaabmaan marka dhibanayaasha iyo qoysaskoodu ay u cawdaan xarunta booliska deegaankooda, oo markaas kiisaskooda loo gudbiyo Waaxda Dambi Baadhista, qabyta danbiyada galmada. Dhibaatooyinka haweenayda dhibanaha ah marxaladaas la soo gudbanaada lama qariyo. Waa in ay baadhayaasha ugu sheegtaa si tifatiran, ugu yaraan laba jeer, waxii dhacay, oo jidhkeeda si hoose loo eego. Habka baadhitaanadani waxay dumarka ku yihiin xanuun. Taas waxaa ka sii daran inta badan baadhitaanadaasi ma soo saaraan caddeymo ku filan oogista dacwada. Garsoore Hargeysa jooga ayaa ku calaancalay in kiisaska kufsigu ay inta badan noqdaan arrin ah 'wuxu yidhi, waxay tidhi' oo aan la helin caddeymo ku filan in eedeysanaha lagu xukumo danbiga.

> Xeer ilaaliyahu waa in uu soo caddeeyaa si dhaafsan shaki macquul ah dhamaan rukunnada Qodobka 398 (kufsiga) ee Xeerka Ciqaabta Guud. Marka dhamaan caddeymaha aad heysid ay yihiin wixii dhibanuhu yidhi, iyo wixii eedeysanuhu yidhi, wey ku adagtahay garsooraha in uu go'aamiyo wixii dhacay.

Xittaa haddii Mashruuca-sharci la ansixiyo, wareeegtadii Xeer Ilaaliyaha Guudna si mug leh loo hirgeliyo, oo daldaloolada caddeymahana la hagaajiyo, dhibanayaasha kufsigu waxaa weli hortaagan xaqiiqada adag ah ee waji-gabaxnimada hey'adaha cadaalad-marista danbiyada. Lacag la'aan, adeega dawliga ah oo, masaafada awgeed, aanay heli karin, maqnaanshaha hab dacwad oogis oo ku haboon dhibanaha, iyo adeeg taakulaynta oo aan ku fileyn dhibanayaasha ayaa gidigoodba keenay in ay dumarka arrimahani saameeyaan iyo ehelkoodu ay ka niyad jabaan oogista dacwadaha. Garyaqaan Hargeysa jooga ayaa tlimaamay sida niyaddoodu ay isu badasho muddo.

> Waxay marka hore leeyihiin socsocod badan waayo waxay isleeyihiin in hay'adaha caddaaladu ay runta soo helayaan. Laakin taasi waa ka hor inta aanay ogaan waxa dhaca. Marka ay arkaan in ay adagtahay in kiiskoodo uu hore u socdo, waxay dareemayaan murugo iyo ceeb. Waxaad taas arkaysaa ka dib marka ugu horreysa ee dhibanuhu maxkamada tagto.

Waxa loo baahanyahay tirakoob (statiskada) sugan oo gundig u noqoneysa siyasaada iyo wax ka qabadka arrimihan.Tani waxay u baahantahay iskaashiga hay'adaha Somaliland in intii suurtagal ah ay,si isku mid ah, u ururiyaan macluumaadka saxa ah ee arrimaha kufsiga.

Ansixinta Mashruuca-sharci eeKufsiga iyo Xadgudubyada Xidhiidhka la Leh iyo hirgelinta Amarkii Xeer Ilaaliyaha Guud waa tallaabooyin muhim ah oo loo qaaday jihada haboon. Hase yeeshe si ay oogista dacwadaha kufsigu u noqdaan kuwo wax ku ool ah oo dhibanaha u waji-furan, waxay Somaliland u baahantahay in ay, si mug leh, wax uga qabato mushkiladaha ku jira marxalad kasta ee dacwad oogista. Warbixinta Horizon waxay muujineysaa talaabooyin taxana ah oo la qaadi karo, oo aan u baahneyn miisaaniyad badan.

*Horizon Institute*waxay soo saartay warbixintan *Cadaalad u Raadinta Kufsiga ka Dhaca Somaliland*si ay u dhiirigaliso wado hadalo iyo xidhiidh ka dhexeya qaybaha cadaalada ee arrimani khuseeyaan iyo xirfadlayaasha caafimaadka, ayna sii ambaqaadaan horumarka uu keenay Amarkii Xeer Ilaaliyaha Guud, iyo in ay isticmaalaan oo taageeraan Mashruuca-

sharci ee Kufsiga iyo Xadgudubyada Xidhiidhka la Leh marka uu xeer noqdo. Horizon waxay rajeyneysaa in warbixintani ay caawiso hirgelinta hab dhan oo lagu joojinayo danbiilayaasha falalka kufsiga Somaliland ka dhaca gala ee aan sharciga la marin, taaso sida uu u sheegay garsoore deggan Borama ka joojineysa fal galayaasha in ay mar kale dambigaas galaan.

> Waxa jiray kiis lay keenay oo eedeysanuhu uu ka hor kiiskaas kufsaday todoba hablood. Mararkii hore waxaa la galay heshiis dhaqameed oo lama keenin maxkamadaha. Markii uu kufsaday dhibanihii sideedaad ayaa kiiskii la noo keenay, waana la xukumay. Haddii markii ugu horreysay la keenilahaa maxkamadaha, dhibanayaal badani may jireen.

Si aad u akhridid warbixinta *Cadaalad u Raadinta Kufsiga ka Dhaca Somaliland*, halkan ka raadso:

---

*Horizon Institute waa hay'ad aan dawli ahayn oo saldhigeedu yahay Somaliland, lana aasaasay 2013. Waxay ka caawisa dawladda, qaybaha gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha aan macaashka ku dhisneyn abuurista iyo ka faa'ideysiga fursadaha horumarinta. Hawlaha Horizon salkoodu waxa weeye meesha ay isugu biyo-shubtaan xuquuqda aadamiga, dhisidda hay'adaha iyo horumarinta laga wado gunta. Waxaanu isku dhafnay sadaxdan maqaam si loo abuuro hindisiyaal keena bulshooyin xoogsada oowixii ku yimaada xallila.*

*Warbixinnada iyo qoraalada waxa lagu darsay arrimahahawlahayaga ka soo dhex baxa. Waxay soo bandhigaan macluumaad iyo qeexitaan loogu talogalay dhaqaajinta ra'yi isdhaafsi dhexmara daneeyaasha, dadweynaha iyo deeqbixiyaasha, iyo dardargelinta siyaasadaha dawladda eeku dhisan xormeynta xuquuqda aadamiga ah, xooginta hey'adaha, iyo dhiirigelinta isku-filaanshaha.*

*Faah-Faahin dheeraad ah, fadlan la xidihiidh: +252 (0) 63 375 1063*

*Si aad u aragtid hawalaha Horizon qabato, eeg Mareegta www.thehorizoninstitute.org ama emayl noo soo dir: info@thehorizoninstitute.org*